



Ujeeddada nidaamka hordhaca ah waa in la hubiyo in qofka u baahan aqoon aasaasi ah inuu helo hawlgal taa ka caawinaya iyo la talin si uu u billaabo waxbarasho ama shaqo.





Degmada ayaa mas'uul ka ah borogaraamka hordhaca ah kaas oo ka kooban waxbarashada af-noorwiijiga, cilmiga bulshada iyo in loo sii gudbo waxbarasho kale ama shaqo. Borogaraamku wuxuu noqonayaa mid maalinta oo dhan socda, oo inta badan la socda xeerarka caadiga ah ee shaqooyinka. Waxaad qaadanaysaa caawin hordhac oo ay canshuuri ku waajibtay. Sidoo kale caawinta ayaa qaar lagaa jarayaa haddii aad maqnaato iyadoo aysan jirin sabab la aqoonsan yahay. Way kuu bannaan tahay inaad shaqayso wakhtiyada aadan borogaraamka joogin, iyadoo aan caawinta lagaa dhimaynin. Dad badan oo borogaraamka dhammeeyay ayaa shaqo helay ama waxbarasho billaabay. Borogaraamku wuxuu socdaa illaa 2 sano, laakiin waxaa marar khaas ah laga dhigi karaa illaa 3 sano.

Ixeerka guud ee sharciga hordhacu waa in borogaraamka hordhaca loogu talo galay dadka qaxootiga ah ee ay da'doodu u dhexayso 18 iyo 55 sano. Waxaa kale oo looga baahan yahay inay degmada ku soo degeen kaddib heshiis dhex maray IMDi iyo degmada. Kooxo kale oo borogaraamka soo hoos geli karana way jiraan. Haddii aadan hubin xuquuqda aad leedahay, degmada ayaa taa warbixin kaa siin karta. FG: Xuquuqda aad u leedahay borogaraamka hordhaca ah iyo caawinta bulshada labadaba waad luminaysaa haddii aad degmo kale u guurto ka hor inta aadan dhammayn borogaraamka hordhaca ah.

U kuurgelidda
aqoonta



Ma taqaannaa waxaad doonayso inaad mustaqbalka qabato? Mise waxaad doonaysaa inaad wax ka ogaato fursadaha aad Norway ka heli karto? Markaad Norway timid, lama hubo inaad ka shaqayn karto wixii aad ka shaqayn jirtay markaad dalkaagi joogtay. Borogaraamka hordhaca ayaa kaa caawinaya in loo kuurgalo aqoontaada iyo qorshahaaga shaqo, si aad ugu dadaashid shaqo/waxbarasho kugu habboon. Arrintan waxaad samaynaysaa adigoo la hadlaya hagahaaga/lataliyaha borogaraamka.

! Waa muhiim inaad xafiddo dhammaan wixii caddaymmo shaqo ama waxbarasho ah, ha ahaadeen kuwo aad kala timid dalkii hooyo ama kuwo aad ku heshay Norway. Caddaymahaan iyo CV-gaada ayaa la gudbinayaa markaad shaqo codsanayso.



Ma waxaad doonaysaa inaad isticmaasho aqoontaadii aad dalkii hooyo kala timid mise waxaad rabtaa inaad waxbarasho cusub qaadato? Midkii aad doorataba waxaad u baahan tahay in qorshe la sameeyo. Qorshaha qofka gaarka u ah ee borogaraamka hordhaca ah wuxuu qeexayaa baahidaada waxbarasho iyo hawlgallada/firfircoonida aad u baahan tahay si aad hadafkaaga u gaarto. Waxaa lagu qabanayaa lataliye borogaraam kaas oo kaa caawinaya sidii aad qorshahaaga u samayn lahayd. Lataliyaha borogaraamku wuxuu isugu kaa duwayaa hawlgallada/adeegyada aad uga baahan tahay hey'adaha kala duwan ee waxbarashada, dugsiyada iyo adeegyada dawladda.



Hadafka waxbarashadaada/xirfadda aad dooranaysa waa inaad adigu doorataa, waana inaad isticmaashaa khibraddaada iyo aqoontaada sidii aad hadafkaas u gaari lahayd. Degmada ayaa kula samaynaysa qorshe adiga gaar kuu ah si aad horey ugu sii socoto. Hirgelinta qorshaha gaarka ah waxay inteeda badan ku xiran tahay dadaalka aad la timaaddo.

Waxbarshada af noorwiijiga
Iyo cilmiga bulshada

Ma doonaysaan inaad
af noorwiiji barataan?

Evet!

Aiwa!

Yey!

Ba'leh!



Cilmiga ugu muhiimsan ee aad u baahan tahay si aad nolol fican Norway ugu noolaato, waa inaad barato af noorwiijiga iyo inaad barato sida bulshadu u shaqayso. Degmadu waxay kuu fidinaysaa barasho af noorwiiji iyo dhawr saacadood oo cilmi bulsho ah kuwaas oo lagugu siinayo luuqad aad fahmayso. Waajib ayay kugu tahay inaad qaadata saacadaha af noorwiijiga iyo cilmiga bulshada ah ama inaad gasho imtixaan caddaynaya inaad leedahay aqoon af noorwiiji oo lagu qanci karo. Degmada ayaa kuu sheegaysa waxbarashada aad sida uu sharcigu qabo xaqa u leedahay islamarkaana waajibka kugu ah inta ay le'eg tahay.

Goobo shaqo oo badan ayaa dadka u shaqeeya ku xira inay af noorwiijiga ku hadlaan. Way kala duwanaa karaan heerka luuqadeed ee ay kugu xiriyaan si ay shaqo kuu siiyaan. Waxayna taasi ku xiran tahay nooca shaqada. Imtixaan ayaad geli kartaa si aad u caddayso heerka ay luuqaddaada af noorwiijigu gaarsiisan tahay. Imtixaanno dalka oo dhan lagu qaado ayaa sanadkiiba dhawr jeer la qabtaa. Degmada ayaa warbixin dheeri ah kaa siinaysa imtixaannadaan.



Furaha barashada af noorwiji fiican aalaaba waa in luuqadda lagu tababbarto ayadoo la joogo goob shaqo. Degmada ayaa mas'uul ka ah inay borogaraamka hordhaca ah siiso goobo shaqo oo luuqadda lagu tababbarto. Tan ayaa waxay fursad kuu siinaysaa inaad dad iyo goobo shaqo labadaba ka barato degmadaddada cusub. Shaqooyinka oo idil kuma habboona goob shaqo oo luuqadda kagu barto mar haddii hadafku yahay in af noorwiji badan lagu hadlo. Waa inaad la hadashaa macallinkaaga af noorwijiiga/lataliyaha borogaraamka si aad u hesho goobta shaqada ee luuqadda lagu barto ee adiga kugu habboon. Muhiim ma aha in goobta shaqada ee luuqadda lagu barto ay ahaato mid ka mid ah meelaha aad doonaysid inaad mustaqbalka ka shaqaysid.

! Tababbarka luuqaddu waa hawlgal ka mid ah waxbarashada. Tababbar luuqadeed oo lagu qaato goob shaqo waxay kaa caawinaysaa inaad af noorwijiiga si fiican degdeg ugu baratid. Degmada ayaa kuu soo helaya goob shaqo oo luuqadda lagu tababbarto. Degmooyinka kala duwan nidaamyo kala duwan ayay lahaan karaan. Waa inaad baartaa deeqda degmadaada ka jirta sida ay tahay.

Tababbar shaqo



FIRMA A/S

Ma og tahay waxa tababbar shaqo yahay? Waa tababbar shaqo oo lagu xoojinayo fursadaha aad u leedahay inaad shaqo ama waxbarasho hesho. Deeqdan waxaa inta badan lagu fidinayaa dhammaadka borogaraamka hordhaca ah. Tababbarka shaqadu waa hawlgal ay degmada iyo NAV labaduba abaabuli karaan. Haddii ay NAV deeqda kuu fidiso, waa inaad NAV ka diiwaangashanaataa adigoo shaqo doone ah. Sidoo kale waxay NAV ku siin kartaa hagiis iyo warbixin ku saabsan hawlgallo suuq shaqo oo kala duwan. Tababbarka shaqadu wuxuu ku salaysan yahay aqoontaada waxaana loo baahan yahay inuu ku xirnaado qorshahaaga qofeed ee gaarka ah. Tababbar shaqo waa fursad shaqo lagu barto. Ma aha "muddo tijaabo ah" oo aad taa dabadeed shaqo joogto ah helayso.

Tababbarka shaqadu wuxuu ka dhacaa goob shaqo oo caadi ah, shaqo barayfat ah ama mid dawladeed. Haddii aad baahi gaar ah u qabto in wax lagula qabto, waxay goobta tababbarku noqon kartaa goob shaqo oo dad gaar ah loogu talo galay. Meel fiican dhigo dhammaanba waraaqaha lagu siiyo. Kuwaasi waa muhiim markaad shaqo codsanayso.

Xiriirro bulsho



Maxaad qaban kartaa si aad wax ugu biiriso degaanka aad ku nooshahay?

Dad badan ayaa khibrad fican u leh ka qaybqaadashada xiriirrada bulsho ee kala duwan sida tusaale ahaan ururrada iyo naadiyada ciyaaraha. Xiriirro fican oo nolashaada ku anfaca ayaa kuwaas laga helaa. Teeda kale, degmooyinka intooda badan waxaa jooga dad cusub oo dhammaystay borograamkoodii hordhaca kuwaas oo talooyin fican ku siin kara. Adigoo kaashanaya kuwa ay ka mid yihiin hagaha qaxootiga (Flyktingguiden - Laanqayrta Cas) ayaad la kulmi kartaa kuwaan iyo dadka kale ee jecel inay ku tusaan dhinacyada kala duwan ee bulshada meesha aad ku nooshahay. Eeg www.frivillighetsportalen.no oo ka eeg wax ku anfacaya, ama la hadal lataliyahaaga borogaraamka.

Norway dad badan baa xubno ka ah ururro iyo naadiyo samafal oo dhawr ah. Hel wax aad xiiseynayso - oo ka qaybqaado firfircooniyada ka dhaca aagga aad ku nooshahay.

Shaqo / waxbarasho danbe



Waa inaad firfircooni muujisaa oo shaqooyin codsataa. Wakhti ayay qofka cusub ku qaadan kartaa sidii uu ugu biiri lahaa suuqa shaqada ee Norway. Ka-qaybqaatayaal badan oo dhammaystay borogaraamka hordhaca ah ayaa markii danbe shaqo helay. Degmadaada ayaa iyada oo kaashanaysa NAV iyo IMDi waxay kaa caawin kartaa inaad gaarto hadafkaaga, laakiin ma jirto cid shaqo kuu ballanqaadi karta. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad shaqo hesho. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad ku khasbanaato inaad qaadato shaqo bar ah ama aad dhawr sano ka shaqayso shaqo ku meel gaar ah ka hor inta aadan helin shaqo joogto ah.

! Hawl adag oo badan ayaa aalaaba qofka ka hor timaadda ka hor inta uusan helin shaqada uu rabo. Khibradaha shaqada oo dhan waa muhiim, waxayna sare u qaadayaan aqoontaada iyo fursadahaaga mustaqbalka.



Waxaa soo saaray: Agaasinta is-dhexgalka- iyo kala-duwanaanta (IMDi)

IMDi Nord: Mas'uuliyadda gobol: Finnmark, Nordland, Troms
IMDi Sør: Mas'uuliyadda gobol: Aust-Agder, Vest-Agder, Telemark

IMDi Midt-Norge: Mas'uuliyadda gobol: Nord-Trøndelag, Sør-Trøndelag, Møre og Romsdal
IMDi Øst: Mas'uuliyadda gobol: Oslo, Akershus, Vestfold, Østfold

IMDi Vest: Mas'uuliyadda gobol: Sogn og Fjordane, Rogaland, Hordaland
IMDi Indre Øst: Mas'uuliyadda gobol: Hedmark, Oppland, Buskerud

Telefon: 24 16 88 00
E-post: post@imdi.no